

Xaqiiqda Cudurada Galmada (STD)

Vaginitis-Som

Xanuunka Xubinta Taranka Haweenka

(waxyaabaha ugu badan ee keena waa: Yeast infection, Trichomonas, Bacterial vaginosis)

CALAAMADAHA LAGU GARTO

Calaamadaha xanuunka xubinta taranka haweenka:

- Cun cun, gubasho ama xanuun laga dareemo xubinta taranka haweenka
- Dheecaan ka badan intii caadiga ahayd
- Dheecaanku wuxuu yeelan karaa midab kale ama ur aan wanaagsanayn
- Haweenka qaar ma muujiyaan wax calaamad ah

Raggu waa qaadi karaa jeermiska haweenka u keena vaginitis

- Dheecaan iyo xanuun yar oo laga dreemo xubinta taranka ragga
- Badankoodu ma yeeshaan wax calaamad ah, laakiin weli waa fidin karaan jeermiska

ISU GUDBINTA

Qaar ka mid ah noocyada Vaginitis-ka waxa Fidin kara:

- Galmada caadiga ah
- Galmada aan caadiga ahayn
- Ragga sida (carrier) jeermiska keena vaginitis-ka

DHIBAATOYINKA KA YIMAADA CUDURKAN

Haddii aan la daaweyn Vaginitis-ka:

- Xanuunka yar ee la dareemaa wuu jiri doonaa
- Raggu waxay qaadi karaan infekshan ku yimaada qanjirka loo yaqaan prostate (prostate gland) iyo kaadi mareenka (urethra)
- Ku fidi kartaa dadka kale eed la galmooto
- Wuxu ka qayb qaadan karaa keenidda cudurka loo yaqaan "pelvic inflammatory disease"
- Haddii qofku uur leeyahay waxay keeni kartaa ilamaha oo dhicisnimo ku dhasha

KA HORTAGGA

Talooyin ku Saabsan Sida loo Yareeyo Fiditaanka Vaginitis (gaaar ahaan Trichomonas):

- Bacda galmada, marka loo isticmaalo si joogta ah saxna ah, waxay yarayn kartaa khatarta in trichomoniasis-ka la isku gudbiyo
- Isticmaal bac galmo oo ku habboon markasta oo aad samaynayso galmo caadi ah ama aan caadi ahayn

- Yaree tirada dadka ay galmadu idinka dhaxayso
- U tag dhakhtarkaaga si aad baaritaan u samaysid haddii aad ka shakido inaad cudurka qaadday
- Ogeysii dadka ay galmadu idinka dhaxayso isla markiiba haddii aad qaaddo cudurka
- Waa in la daaweeyaa dadka ay galmadu ka dhaxayso ee cudurka qaada (looma baahna in la daweyyo haddii infekshanka uu keenay yeast ama bacterial vaginitis)

DAAWEYNTA

Daaweynta Vaginitis:

- Vaginitis waa la daaweyn karaa marka la qaato daawadeeda saxda ah ee dhakhtarku qoro
- Trichomonas-ka, dadka ay galmadu ka dhaxayso ee cudurka qaada waa in isku mar la daaweeyaa
- Trichomonas-ka, ogeysii dhakhtarka haddii aad uur leedahay ama laga yaabo inaad yeelan karto

Daaweynta Yeast Infekshan:

- Daawooyinka aan dhaqtarku qorin balse laga iibsano karo farmashiyaha waxa isticmaali kara kaliya haweenka:
 - Uu horey ugu dhacay yeast infekshanku uuna xaqiijiyay dhaqtar baaray
 - Yeesha calaamdaha lagu yaqaan yeast infekshanka

WIXII WARAR DHEERAADA, LA XIRIIIR:

Infectious Disease Epidemiology, Prevention and Control Division

STD and HIV Section

Minnesota Department of Health

P.O. Box 9441

Minneapolis, MN 55440-9441

(612) 676-5414; (612) 676-5653 TTY

Khadka Teleefonka ee Qorshaynta Qoyska iyo Cudurada Galmada (STD) ee Minnesota

(Minnesota Family Planning and STD Hotline)

1-800-783-2287 Teleefonka caadiga ah /TTY

Khadka Taleefonada Hay'adda Qaranka CDC

Qaybta Qaabilsan Cudurada STD iyo AIDS

(CDC National STD and AIDS Hotlines)

1-800-227-8922; 1-800-243-7889 TTY